



UJEDDO:- CADEYN QIRAAL QAADASHO QISMI DHAXAL AH.

Maanta oo ay taariikhdu tahay **03/08/2023**, anigoo ah **Dr, Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, ahna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Kooraad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheen ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid ayagoo heshiis ah, mudanayaasha Soomaaliyeed hoos ku xusan .

B- Anigoo ah **NATHIFA ADAN ABDOW**, Somali-Kenyan ah, ku dhalatay Mandera 01/01/1995-tii, Leh Passport No.AK0902616, sawirkeeyguna ku lifaaqanyahay Aatadaan, kana mid ah dhaxaltooyadda Marxuum **AXMED YUUSUF MAXAMED**, Ayaan waxaan qoraalkaan Ku qiraya kuna cadeynayaa in aan qaatay qismigeysa dhaxaleed ee iiga soo aaday hantida laga dhaxlay Marxuum Saygeysa **AXMED YUUSUF MAXAMED**, kadib markii hantidaas loo qeybiyay habka shareecada islamka sida ku cad Warqadda ku taarikhesan 03/02/2023, kana soo baxday Abu-Bakar Islamic Centre Trust, uuna ku saxiixanyahay Sh.Maxamed Cabdi Umal, waxaa lacag ahaan qismigeysa iigu soo aaday lacag dhan \$ **135,717**(Boqol sodon iyo shan kun todoba boqol toban iyo todoba Oo doolarka mareekanka ah), una qaatay sida soo socota:-

T. Lacag dhan \$ **55,000** (Konton iyo shan kun oo doollarka mareekanka ah), waxaan u qaatay Flat ku yaala Magaalada Nairobi, Park Road ee Xaafada Pangani, Dhismaha MashaAllah Towers, Flat No.E1.

J. Lacag dhan \$ **55,000** (Konton iyo shan kun oo doollarka mareekanka ah), waxaan u qaatay Flat ku yaala Magaalada Nairobi, Park Road ee Xaafada Pangani, Dhismaha MashaAllah Towers, Flat No.E3.

X. Lacag dhan \$ **25,717**, (Labaatan iyo shan kun todoba boqol toban iyo todoba) waxaan ku qaatay guri, Kadib markii gurigaas lagu qiimeeyay lacag \$ **35,000** (Sodon iyo Shan kun oo doollarka mareekanka ah) gurigaas oo ku yaala Magaalada Muqdisho, Degmada **Yaaqshiid**, cabirkiisuna yahay **20X10-M, Lotto No.141-H**, Sohdintiisuna tahay Bari **Jid**, inta kale dhul dad, Leh Warqadda Beeca **Rep No.33035/2017, Tr.01/05/2017**, kana soo baxday Xafiiska Nootaayaha Muqdisho, uuna ku saxiixanyahay Dr.Maxamed Cabdulqaadir Sh.Xasan, waxaa dhaxaltooyada inteeda kale u celshay Lacag dhan \$ **9,283** (Sagaal kun labo boqol sideetan iyo sedax oo doollarka mareekanka ah), sidaas darteed waxaan u cadeynayaa una qiraya cid walba uu qoraalkaan quseeya in la I siiyay saamigeysa dhaxaleed ee iiga soo aaday hantida laga dhaxlay Saygeysa Marxuum **AXMED YUUSUF MAXAMED**.

Waxaana Cadeeyntaan qiraalka qaadashada qismiga dhaxaleyd saxiixay Anigoo miyrikeygu taam yahay, waxgaradkeygu wanaagsan yahay xor'ahay cidna i qasbin, wax alaale iyo wixii aan ku cadeyn qoraalkaan waxaa Loo raacayaa sida uu sharcigu qabo.

SAXIIXA CADEYSADA

NATHIFA ADAN ABDOW

NATHIFA

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1-ISMAIL ALI OSMAN

2-ABDULLAHI ABDIRAHMAN ADAN

Rep. 778/TPN/2023

(**CADDEYN TA NOOTAAYAHA**)

Tr.03/08/2023

Anigoo ah Nootaayaha Tayo, **Dr, Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, waxaan cadeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa **1- NATHIFA ADAN ABDOW** iyo waliba Labada Nin ee Soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay Cadeeyntaan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, Caafimaad qaba, Xiskooduna taam yahay, Cid khasbeysana aysan jirin..

NOOTAAYAHA

Dr, Maxamed C/laahi Ma xamed "Max'ed Notaayo"




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 10/08/2023

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed Siyaad** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/raxmaan Yuusuf Maxamuud** Dukumiintiga **Original** Caddeynta Qiraal Qadasho Qayb Dhaxaleed **Rep No. 778/W.P.N/23, Tr. 03/08/2023**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	C/raxmaan Yuusuf Maxamuud
Taariikhda Caddeynta	03/08/2023

Loo Caddeeye: Aniga oo ah **C/raxmaan Yuusuf Maxamuud** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed Siyaad

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/raxmaan Yuusuf Maxamuud